

**Everywhere
for everyone.**



**Maalinta Adduunka
LaanqarytaCas/BishaCas - 2016**

Fariinta Madaxweynaha SRCS

Sanad kasta, dhaqdhaqaqa Laanqaryta Cas/Bisha Cas waxay u dabaal degaan Maalinta Adduunka Laanqaryta iyo Bisha Cas oo la qabto 8-da Maajo. Ururada Laanqaryta Cas iyo Bisha Cas oo ay ku jiraan SRCS waxay dalalkooda ku abaabulaan hawlo si ahmiyad u saaraan doorka gaarka u ah dhaqdhaqaqa.

Sanadkan Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed(SRCS) waxay u dabaaldegayaan guulaha geesnimada lahaa oo ay sameeyeen mutadawiciinteeda iyo shaqaalaheeda kuwaas oo adeegyadooda nolo-badbaadinta iyo nolol bedelka ah ay xaqijineyso in ballanqaadyadeena aadanaha maalin kasta. Waxaa nahay hay'ad maxali ah, madaxbannaan dhexdhedaad ah **qof kasta ayaan u joognaa goob kasta**.

Adduunka oo dhan, Dhaqadhaqaqa Caalamiga Laanqaryta Cas iyo Bisha Cas waxay taageero siiyan dadka ugu nugul ee xaalado kasta ka bilaabata ka jawaabida baahiyaha waqtiyada musiibada iyo xaaladaha dagaalada iyagoo xarumaha magaalooyinka iyo meelaha in la gaaro ay adag tahay siiya taageero iyo una dooda dadka u baahan.

Sanad kasta dalka gudhiisa SRCS waxay taageertaa dadka ugu nugul waqtiyada colaada iyo musiibooyinka dabiiciga ah. Waxaa naga go'an in bulshooyinka nugul siino adeeg aadminimo ku habboon oo waafaqsan waqtiga hadda iyo mustaqbalka.

Ururku wuxuu adeegyo daryeelka caafimaadka siiyaa dadka ugu nugul oo ku sugan dalka ayna ku jiraan haween iyo caruur. Waxay mammushaa xarumaha dhaqancelinta naafada waxay bixisaa adeegyada baafinta si ay dib ugu soo celiyaan xiriirka qoyska. Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay sidoo kale dadka nugul ku taageertaa u diyaarinta xaalad kasta oo deg deg ah, ayna yareyneysko khataraha waxayna xoojiyaan adkeysiga iyadoo loo maraayo waxqabadyo ku saleysan bulshada.

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed(SRCS) waxay la shaqeysaa bulshada si wax looga qabto caqabadaha iyadoo la abaarayo asalka dhibka. Shaqaalahaa SRCS iyo mutadaciinta waa laf-dhabarka dadaalada jimciyad-qarameedka si ay u xoojiyaan awoodaha bulshooyinka.

SRCS waxay ku celcelineysa ballanqaadkeeda ahaa in ay noqoto jimicyad-qarameed si fiican u shaqeynaya una taagan wax waqabad taxadar gooni ahna siinaya meelaha baahida mudnaanta leh. Ururku wuxuu ku dadaalayaa in uu la shaqeeyo bulshooyinka oo dhan, maamulada deegaanka iyo la-hawlgalayaal kale.

Waxaan jeelaan lahaa in fursadaan ku salaamo mutadawiciinta iyo shaqaalahaa dadaalkooda iyo iyagoo u go'doomeen caawinta dadka nugul oo ku sugan dalka. Wuxaan

jeelaan lahaa in mutadawiciinta SRCS, shaqaalaha iyo qoysaskooda fursad badan soo noqnoqata oo farxad leh.

Yuusuf Xasan Maxamed
Madaxweynaha SRCS